Co-funded by the European Union

CASHARKA 5: SAHMINTA AQOONSIGAAGA

Qore: Margaret William

Fasalka/Heerka:
Dugsiga Dhexe (Da'da 12–14)
Maadada:
Af-Carabi
Wakhtiga:
60 daqiiqo

Hadafka:

- Ardaydu waxay ka fiirsan doonaan oo muujin doonaan aqoonsigooda iyagoo adeegsanaya Af-Carabi.
- Ardaydu waxay ku tababaran doonaan xirfadaha hadalka, qorista, iyo hal-abuurka.
- Ardaydu waxay baran doonaan erayo muujinaaya aragtiyadooda.

Qorshaha Casharka:

1. Diyaar-garow (10 daqiiqo)

- Ku qor erayga '**Aqoons**i' sabuuradda.
- Weydii ardayda: Maxay 'aqoonsi' ka dhigan tahay?
- Dood kooban oo fasalka ah: ka fikir fikrado iyo erayo la xiriira 'aqoonsi' (tusaale, hiwaayado, hibbooyin, dhaqanka, riyooyinka).

---

2. Dood La Hagayo (15 daqiiqo)

- Soo bandhig oo ka dood su'aalaha soo socda mid mid:
  - Haddii aad isku tilmaami lahayd saddex eray, waa kuwee erayadaas, maxaase sabab u ah?
  - Maxaad ugu faan badan tahay naftaada?
  - Maxaad ugu jeceshahay inaad sameyso oo runtii kuu muuqata qayb ka mid ah qofnimadaada?
  - Yaa ama maxaa kugu dhiirrigeliya inta badan, sideese taasi u saameysaa noloshaada?
  - Haddii laguu aqoonsan lahaa wax gaar ah, maxay noqon lahayd?
- Ku dhiirrigeli ardayda inay marka hore si afka ah uga wada hadlaan jawaabaha gaagaaban koox koox ama koox yar, ka dibna fasalka oo dhan.

---

3. Hawl Qoraal ah (20 daqiiqo)

- U Sharax ardayda shaqada guriga: qoritaanka hal weedh oo naftooda ka hadlaysa iyo iyagoo sawir ay sawireen ku muujinaayo.
- Tusaale u soo bandhig sida loo qoro jumlad ama weedh:
  - Ku bilow si hordhac ah ('Magacaygu waa..., waxaana isku tilmaami lahaa sida...')
  - Isticmaal qaar ka mid ah fikradihii doodda ka soo baxay.
  - Ku soo gabagabee jumlada xidhitaanka ('Kani waa qofka aan ahay, waana ku faanayaa!')

- Ardaydu ha bilaabaan qorista weedhaha fasalka dhexdiisa (waxay ardaydu ku dhammayn karaan qoraalka fasalka gudahiisa haddii kale wakhti kale sii ardayda).

---

4. Hawl sawirid ah (10 daqiiqo)

- Kadib marka ay wax qoraan, ardaydu waxay bilaabayaan inay sawiraan sawir - gacmeedyo iyo qoraal isku xiga.
- Tani waxay noqon kartaa sawir dhab ah ama mid astaan ah (oo muujinaya xiisahooda ama riyooyinkooda).

---

5. Gunaanad (5 daqiiqo)

- Iskaa wax u qabso degdeg ah: dhowr arday ayaa wadaagi kara hal jumlad oo ka mid ah qoraalkooda ama wax muujinaaya sawirradoodii hore.
- Xusuusi inay dhammeeyaan shaqada guriga haddii aan la dhammayn: Dhammay qoraalkaaga iyo sawirkaaga xisadda xigta*!*

Shaqo guri:

- Dhammaystir qoraalkaaga oo sharaxaya qofka aad tahay.
- Dhammaystir sawir qofeedkaaga.

Qiimayn:

- Ka qaybgalka doodda.
- Dhammaystirka iyo fikirka ku jira qoraalka iyo sawirka.

Translator: Abdullahi Ahmed – Uppsala - Sweden